



nfu

**In aan ku caawinno
ayaan diyaar u nahay!**

Xubin ka noqo!

- Adiga ama dad qoyskiinna ah ma leedihiin ilmo ka duwan carruurta kale ee ay isku da'da yihiin?
- Ma doonaysaa in aad dad kale la kulanto oo kala sheekeysato farxadda iyo murugada aad ilmahaaga kala kulanto?
- Haddii aad ku biirto Ururka norwiiijiga ee dadka maskaxiyan dhimman (NFU) waxaad la kulmaysaa qoysas kale oo ku sugan xaalad taada la mid ah.

Waxaa jira talooyin iyo taageero kala duwan oo la siiyo waalidka haysta carruur u baahan caawin badan. Arrintan waxaad wax badan ka ogaan kartaa marka aad NFU xubin ka tahay. Annagu haddaa NFU nahay waxaan kaaga jawaabi karnaa su'aasha ah waxa aad xaqa u leedahay. Halkan ayaad ka akhrisan kartaa dhammaanba waxyaalaha aan kaa caawin karno.





Waannu is caawinnaa

«Ilmahaygu lama mid ah carruuraha kale. Way fiicnaan lahayd in lala sheekeysto dad ku sugan xaalladdaas oo kale!»

NFU waxaad kula kulmi kartaa dad kale oo xaaladdaada oo kale ku sugan. Halkan oo ay isku arki karaan carruurta maskaxiyan dhimman walaalhood. Dalka oo idil waxaan ku leennahay ururro gobol iyo kuwo degmo. Waxay qabtaan koorsooyin iyo isu-imaatinno xambaarsan waxyaalo maaddo ah iyo kuwo bulsho intaba. Koorsooyinka waxaa loogu talo galay waalidka, walaalaha iyo xubnaha maskaxiyan dhimman.



Talo iyo caawin

NFU waxay waalidka warbixin ka siisaa caawinta ay xaqa u leeyihiin qoysaska haysta carruur maskaxiyan dhimman. Waxaa halkan ku qoran qaar ka mid ah su'aalaha aan inta badan ka jawaabno:

«Waa daalay, caawin noocee ah ayaan heli karaa?»

Waalidka haysta carruur u baahan caawin badan, waxaa la siin karaa taageero kala duwan. Waxaa tusaale ahaan lagu caawin karaa qof ilma-ha ugu haya guriga ama guriga dibaddiisa. Taa waxaa la yiraahdaa nasin.



Xannaano carruur iyo dugsi

«Ilmahaygu xannaano carruur ma dhigan karaa, caawin sidee ah ayuuse ilmuhu heli karaa?»

Carruuraha oo idil way dhigan karaan xannaano carruur. Degmada aya laga doonayaa in ay hubiso in ay carruurta maskaxiyan dhimman helaan caawin iyo taageero dheeri ah.

«Ilmahaygu dugsi ma dhigan karaa, caawin sidee ah ayuuse ilmuhu heli karaa?»

Carruuraha oo idil dugsi qayb bay u leeyihiin waajibna wuu ku yahay. Dhammaan ardayda u baahan caawin dheeri ah si ay wax u bartaan, xaq ayay u leeyihiin in ay taas helaan. Waxaa la yiraahdaa waxbarashada khaaska ah. Waxbarashada khaaska ahi waa in ay noqotaa mid uu ilmuhu fahmi karo oo wax baran karo.

NFU waxay doonaysaa in ilmaha maskaxiyan dhimmani ay xannaanada carruurta iyo dugsigaba ku helaan deeqda ugu fican ee suurtagalka ah.



Shaqo

«Ma jirtaa shaqo ay qaban karaan dadka maskaxiyan dhimman?»

Waxaa jira fursado shaqo oo kala duwan oo loogu talo galay dadka maskaxiyan dhimman. Qaar badan ayaa shaqayn kara, doonayana in ay shaqeeyaan. NAV ayaa bixin karta warbixinta fursadaha shaqo. Waxay leeyihiin noocyo badan oo caawin ah si ay qofka ugu suuragasho in uu shaqada guto

NFU waxay doonaysaa in dadka maskaxiyan dhimman ay helaan shaqo ay jecel yihiin.

Guri qofka gaar u ah iyo wakhtiga firaqada la yahay

«Dhallinyarada maskaxiyay dhimman goonidooda ma u degi karaan kaddib marka ay 18 sano gaaraan?»

Qaar badan oo maskaxiyay dhimman ayaa goonidooda u degi kara, doonayana in ay goonidooda u degaan. Waxay xaq u leeyihiin in laga caawiyo guri iyaga u gooni ah, meel kasta oo ay ku nool yihiinba. NFU ayaa ku siin karta warbixinta fursadaha jira ee caawinta iyo taageerada.

«Fursado caynkee ah ayuu ilmahaygu u leeyahay in uu ka qaybqaato firfircooniyaada kala duwan ee wakhtiga firaqada la yahay?»

Waxaa jira firfircooniyaal badan oo la qabto wakhtiga firaqada la yahay kuwaas oo ay ka qaybqaadan karaan carruurta iyo dhallinyarada maskaxiyay dhimman. Ururka degmada iyo kan gobolka ee NFU ayaa kuu sheegi kara firfircooniyaasha ka jira meesha aad deggan tahay. Carruurta iyo dhallinyarada maskaxiyay dhimman waxaa loo qaban karaa qof caawiya (støttekontakt) oo raaci kara wakhtiyada firaqada la yahay.

NFU waxay doonaysaa in dadka oo dhammi ay helaan fursado isku mid ah oo wakhtiga firaqada la yahay lagu kala doorto firfircooniyaal kala duwan.

Ma doonaysaa in aad ogaato in intan ka badan?

NFU waxaad ku ogaanaysaa sida aad u codsan karto caawinta aad ilmahaaga u dooneyso – tusaale ahaan caawinta aad uga baahan tahay degmada ama NAV.



Xubin ka noqo!

- Wax badan ayaad ku helaysaa xubin-ka-noqoshada NFU.
- Waxaa la-talin bilaash ah lagaa siinayaa adeegyada caafimaadka- iyo daryeelka, xannaano carruur, dugsi, shaqo, wakhtiga firaaqada la yahay iyo hoy.
- Xubnaha waxaa la siinayaa wargeyska Samfunn for alle.



Xubin ka noqo!

Xubinnimada NFU ee halki qof sanadki waa:

- Xubin keligeed ah kr. 495,-
- Xubin qoys oo isku ciwaan ah kr. 250,-
- Ilmo ay da'diisu ka yar tahay 18 sano kr. 70,-

Ogoow! Ilmaha ay da'diisu ka yar tahay 18 sano keliigiis xubin ma noqon karo. Waa in ay isku ciwaan ahaadaan qofka xubinta ah ee qoyska ka midka ah.

Magac:

Ciwaan:

Lambarka boostada iyo goobta:

Lambarka teleefanka gacanta:

Taariikh dhalasho:

Iimayl:

Magaca xubin keligeed ah oo ay isku ciwaan yihiin:

(waxay khuseysaa carruurta ay da'doodu ka yar tahay 18 sano iyo xubin qoyskooda ah)

Saxiix:

Adressaten betaler
for sending i Norge



Distribueres av
Posten Norge

**Norsk Forbund for
Utviklingshemmede**

Svarsending 1225

0090 Oslo



Nala soo xiriir haddii aad dooneyso warbixin intan ka badan:

Norsk Forbund for Utviklingshemmede

✉ Postboks 8954 Youngstorget, 0028 Oslo

☎ 22 39 60 50

@ firmapost@nfunorge.org

🔍 www.nfunorge.org

📘 www.facebook.com/NFUorge

nfu

*Norsk Forbund for
Utviklingshemmede*

